



Adeegyada Cuntada

Waaxda Adeegyada Cuntadu waxay cunto siiyaan in ka badan 110,000 ardey iyo cuntooyin fudud maalin kasta ardeyda iyo shaqaalaha dugsiga la siiyo. Barnaamijyada casriyaysan ee cusub ee dugsiyada hoose iyo sare waxay muhim u yihiin isbeddelka ahmiyada la saareyo hawlaha la xidhiidha adeegyada cuntada. Dulucda arrintaasu waa in ardeyda la siiyaa cunto nafaqo leh oo ay kala dooran karaan.

Barnaamijka cusub ee ay Ilmuhu Cuntada makhaayada kala dooran karaan waxaa la dhammeeyey bishii Maajo 2004, taas oo loo sameeyey dhammaan 130 dugsi ee hoose. Cuntada ay Ilmuhu Makhaayada ka kala dooran karaan waa afar nooc oo cunto ah oo ay midho iyo khudaari ku jirto maalin kasta. Barnaamijkanu wuxuu ardeyda ku dhiirigelinayaa inay si joogto ah dugsiga uga cunteeyaan, taas oo u jihaynaysa kala doorashada cuntooyinka. Qiimaha qadada dugsiyada hoose waa \$1.25.

Ardeyda waxaa lagu dhiirigelinayaa inay maalin kasta dugsiga ka quraacdaan, taasi waxay fursad u siineysaa inay helaan wakhti ku filan oo ay fasalka yimaadaan iyagoo waxbarasho diyaar u ah. Cuntada ay Ilmuhu Makhaayada wakhtiga quraacda ka kala dooran karaan waa saddex nooc oo cunto ah, ayna ka mid yihiin ciirta iyo heed kala duwan oo aan la macaaneynin. Makhaayda saladhka waxaa laga heli karaa midho daray ah, heed iyo midho qalalanba. Intii uu barnamijkan ay Ilmuhu Cuntada Makhaayada ka kala dooranayaan ay bilaabantay waxaa kordhay carruurta makhaayda dugsiga ka quraacata ama qadeysa. Dugsiyada sare xataa quraac ayaa la siiyaa. Qiimaha quraacda dugsiga hoose iyo kan sareba waa \$0.50.

Ardeyda ku jirta dugsiyada dhexe iyo sare waxay leeyihiin cuntooyin badan oo ay kala doortaan oo nafaqooyin leh, qiimha qadaduna waa \$1.75. Waxaa kala oo jira baabuur la riixo oo ay cuntooyin kala nooc ah ku jiraan sida rootiga hilibka la dhexgeliyey, cuntada Mekiskaan iyo kibista la dubay, iyo weliba saladh, ceesh hilib, iwm la dhexgeliyey iyo maraqba. Marka la dhammeeyo barnaamijka dugsiga hoose, waxaa ku xigeya oo ahmiyada la saareya in isbeddelo lagu sameeyo makhaayadaha dugsiyada sare. Laba iyo toban dugsi oo sare ayaa leh baarar saladhka laga cuno, iyo cuntooyin ay ka kala dooranayaan Power Up Cafes.

SDCS waxay cunto lacag la'aan ah iyo mid qiimaha la dhimeyba siiyaan ardeyda uu dakhliga qoysaskoodu yar yahay sida ay tilmaameyo Waaxda Beeraha ee Maraykanka (USDA). Ardeyda dugsiyada degmadan in ka badan nus ayaa xaq u leh cunto lacag la'aan ah ama mid qiimaha wax laga dhimay. Bilowga sannad-dugsiyeed kasta waxaa waalidiinta loo soo diraa araaji ay ku soo codsan karaan cuntada lacag la'aanta ah ama ama mida qiimaha la dhimay.

Waaxda adeegyada Cuntada ee SDCS waxay aaminsan tahay in jidhka fayow uu keeno maskax fayow. Dhammaan waraaqaha lagu qoro cuntooyinka la dalban karo waxaa diyaariya qof khihrad u leh cunto qaadashada nidaamsan oo diiwaangashan, kaas oo adeegsaneya koombiyuutar cuntadda kala saara si loo hubsado in maalin kasta ardey kasta in la siiyo cunto dheelitiran oo nafaqo leh.

Waxaa lagu daabacay kaalmada laga helay Ururka Annie E. Casey Foundation

Somali Version: Food Services Fall 2005

Warbixinada kala Xidhiidh: Adeegyada Cuntada: (858) 627-7340
Su'aalaha Warbaahinta : (619) 725-5578

www.sandi.net

San Diego City Schools (SDCS) waa kan labaad ee ugu weyn waxbarashadda degmooyinka ee California. Waxay u adeegtaa in ka badan 138,000 oo ardey. Waxay leedahay in ka badan 200 oo waxyaabaha waxbarashadda sahla ah, iyo in ka badan 14,500 jagooyin shaqo-buuxda u dhigma (oo meteleya 15,800 oo shaqaale ah.) SDCS waxay ahmiyada saartaa inay hagaajiyaan xirfadaha waxbarashadda aasaasiga ah ee xaga akhriska, qoraalka iyo xisaabta ee fasalada Xanaanada ilaa iyo 12aad. Waxbarashadda degmada waxay u heellan tahay inay taageero dugsiyada iyo inay kobciso jawiga waxbarashadda ee fasalka dhexdiisa ah, iyadoo adeegsanaysa qalab casri ah iyo taageerooyinka ay ka helayso hawlgalka waalidka, macallinka, iyo jaaliyada ee dhinacyada waxbarashadda.

Ujeeddada Dugsiyada Magaaladda San Diego waxaa weeyaan inay ardeydu guul ka gaadhaan waxbarashadda, waxaana laga taageeri doonaa xaga wax dhigista iyo waxbarashadda fasalka dhexdiisa ah.